DARDAARANKA HORE
BARWAAQO-SOORANKA

Anigoo ah, _____, waxaan si ogsoonaan iyo istikhyaar ah kuugu sheegayaa inaad ogaato dardaarankayga haddii ay dhacdo inaan noqdo qof aan awoodin inuu sameeyo go'aan macquul ah, waana sidan soo socota:

Waxaan fahansanahay inuu dardaarankayga hore uu ku jiro xulashada qof wakiil ah iyo inaan dejiyo xulashooyinkayga la xiriira xanaanada caafimaadka. Ereyga "xanaanada caafimaadka" waxuu la macno yahay bixinta adeegyada ee qof walba iyadoo ay ujeedadu tahay ka hortagista, ka qaadista, daawaynta ama bugsoonaysiinta jirro bani'aadam, dhaawac, ama curyaanimo jirka ah, oo ay ku jirto, laakiin aan ku koobnayn, daawooyinka; qalliinka, dhiig ku shubista, daawo-kiimikeedka (chemotherapy); daawo fallaareedka (radiation therapy); isbitaal seexinta, xarumaha gargaarista nolosha ama xarumo kale ee caafimaad, daawaynta caafimaad ee jirrooyinka maskaxda ama dhimirka; iyo hababka nolol-dheeraynta iyo xanaanada xanuun-yaraynta.

Weedha "awood la'aanta samaynta go'aanno macquul ah" waxay la macno tahay qof aan awood u lahayn inuu fahmo dabeecadda, xaddiga, iyo cawaaqibka ka imaan kara go'aanka xanaanada caafimaadka ee la soo jeediyay ama aan awood u lahayn inuu sameeyo qiimayn cagli-gal ah ee khasaarooyinka ama faa'idooyinka go'aanka xanaanada caafimaadka ee la soo jeediyay marka lala barbar dhigo khasaarooyinka ama faa'idooyinka go'aanno kale ee ka duwan go'aanka hore, ama aan awoodin inuu wada xiriir ka sameeyo fahankan noocii ay noqotaba.

Go'aanka inaan ahay qof aan awoodin samaynta go'aanno macquul ah waxaa samaynaya dhakhtarka ii adeegaya iyo dhakhtar labaad ama qof cilmi-nafsiga ku takhasusay oo shati leh kadib markii si shakhsi ahaan ah ay ii fiiriyaan aniga waana in lagu xaqiijiyaa qoritaan. Dhakhtar labaad ama qof cilmi-nafsiga ku takhasusay ee shatiga leh ma aha inay noqdaan kuwo imminka ku taxaluqa daawayntayda, aan ka ahayn marka dhakhtarkan xorta ah ama qofkan cilmi-nafsiga ku takhasusay oo shatiga leh ay suurtogal noqon wayday in la helo kuwa kale ee la mid ah. Xaqiijintan waxaa loo baahan yahay ka hor inta aan la bixin xanaanada caafimaadka, la sii wadin, la hakiyin, laga noqan, kana horaysa waqtiga qof wakiil ah loo ansaxinayo awooda uu ku samaynayo go'aanno xanaanada caafimaadka isagoo aniga i matalaya, iyo inta ka horaysa, ama sida uga dhakhasaha iyo suurtogalka badan dabadeed, marka xanaanada caafimaadka la bixiyey, la sii waday, la hakiyay, laga noqday, ee 180-kii maalmood oo kasta ee markaas ka dambaysa ayna baahida xanaanada caafimaadka sii soconayso.

Haddii, waqtigii ay noqoto, aan noqdo mid loo go'aamiyay inuu yahay qof aan awoodin samaynta go'aanno macquul ah, waa in la i soo ogaysiiyaa, illaa iyo xadka aan awooda u leeyahay helitaanka ogaysiiskan, go'aankaasna la sameeyay ka hor inta aan xanaanada caafimaadka la bixin, la sii wadin, la hakiyin, ama laga noqan. Ogaysiiskan waa in sidoo kale loo siiyaa, sida ugu dhakhsaha iyo suurtogalka badan, wakiilkayga aan magacaabay ama qofka uu awooda siiyay xeerka § 54.1-2986 si loo sameeyo go'aanada xanaanada caafimaadka iyadoo aniga la i matalayo. Haddii dabadeed uu dhakhtarka go'aamiyo inaan ahay qof samayn kara go'aanno macquul ah, qoraal ahaan, kadib marka qof ahaan la ii fiiriyay, waxii dheeraad ah ee go'aanada xanaano caafimaad waxay u baahanayaan ogolaanshahayga.

XULASHADA 1aad: BALLANTA WAKIILKA (XARRIIQ DHEXMARI FURSADAHA 1 & 2 HADDII AADAN DOONAYN INAAD MAGACAWDO WAKIIL KUU SAMEEYA GO'AANADA XANAANADA CAAFIMAADKA).

Waxaan halkan ku magacaabayaa _____ (wakiilkayga koowaad), ee (cinwaan iyo telefoon) _____, inuu yahay wakiilkayga ii samaynaya go'aanada xanaanada caafimaadka isagoo aniga i matalaya awoodaasoo aan ku siiyay dokumentigan.

Haddii _____ uusan ahayn qof ay helitaankiisu suurtogal tahay ama aan awoodin ama aan doonayn inuu ku matalo wakiil ahaan, marka magacoow (wakiil ku xiga), ama (cinwaan iyo telefoon) _____, si uu kuugu adeego asagoo booskaas buuxinaya (capacity).

Waxaan halkan ugu ansaxinayaa wakiilkayga, magaca kore, awood buuxda uu ku sameeyo go'aanada xanaanada caafimaadka isagoo aniga i matalaya sida aan hoos ku sharxay mar alle iyo markii laa ii arko inaanan awood u lahayn samaynta go'aanno macquul ah. Awooda wakiilkayga waxii halkan ka hooseeya waa mid dhaqan gal ah oo shaqaynaysa illaa iyo inta aan ahay qof aanan samayn karin go'aanno macquul ah.

Iyadoo la isticmaalayo awooda samaynta go'aanada xanaanada caafimaadka iyadoo aniga la i matalayo, wakiilkayga waxuu raacayaa waxyaalaha aan doonayo ama xushay oo dhan kuwaasoo aan ku sharxay dokumentigan ama haddii kale kuwa uu yaqaano wakiilkayga. Wakiilkayga waxaa hogaaminaya waxyaalaha ay tuseen baaritaanka caafimaadka iyo xaaladayda caafimaad ee la filayo iyo waxii akhbaar ah oo ay bixyaan dhakhaatiirtayda sida waxii aan faai'do ii lahayn ama farogelin ah (intrusiveness), xanuun, khatarro, iyo waxyeelooyin ee la xiriira daawaynta ama daawayn la'aanta. Wakiilkayga ma samayn karo wax go'aan ah ee la xiriira xanaanada caafimaadkayga ee uu isaga og yahay, ama uu ku ogaan karo waydiin yar oo macquul ah oo ay tahay inuu wax ku ogaado, inay ka soo horjeedaan waxyaalaha aan rumaysanahay diin ahaan iyo mabada'ayga aasaaska ah, kuwaasoo aan ku muujiyay qoraal ama hadal ahaan. Haddii wakiilkayga uusan go'aansan karin nooca xanaanada caafimaadka uu samayn lahaa isagoo aniga i matalaya, marka wakiilkayga waa inuu ii sameeyaa xulasho isagoo ku salaynaya waxa uu rumaysan yahay inay tahay danta iigu fiican.

XULASHADA 2aad: AWOODAHA WAKIILKAYGA (XARRIIQ DHEXMARI LUQADDII AADAN ADIGA RABIN KUNA DAR LUQADII AAD ADIGA RABTO).

Awoodaha wakiilkayga waxaa ku jira waxyaalaha soo socda:

A. Inuu ogolaado ama diido ama ka noqdo noocii ay noqoto daawaynta xanaano caafimaad, hab qalliin, hab baaritaan, daawayn iyo isticmaalka mashiino ama habab kale ee saameeya shaqada qayb jirka ka mid ah, oo ay ku jirto, laakiin aan ku koobnayn, neefsasho aan dabiici ahayn, siin aan dabiici ahayn ee nafaqo iyo biyo, iyo dib-u-soo kicinta wadnaha iyo sambabka. Awoodsiintan waxaa si gaar ah ugu jira awooda ogolaanshaha siinta qiyaaso (dosages) daawooyinka xanuunka-yareeya kuwaasoo ka yare badan qiyaasaha inta badan lagu taliyo xaddigaas dheeraadka ahna uu ku filan yahay inuu xanuunka iga yareeyo, xitaa haddii daawayntan wadato

khatarta ah inaan u baranayo (addiction) ama si aan ula kac ahayn ay u dedejin karto dhimashadayda;

B. Inuu codsado, helo, dibna u eego akhbaar walba, hadal ama qoraal, ee la xiriirta wax walba oo caafimaadkayga ah ee maskaxda iyo jirka, ayna ku jirto laakiin aan ku koobnayn, rikoorada isbitaalka iyo caafimaadka, iyo ogolaanshaha bixinta akhbaatan;
C. Inuu shaqaalaysiiyo ama cayriyo bixiyeyaasha xanaanada caafimaadkayga;
D. Inuu bixiyo awooda la igu seexinayo ama la igaga saarayo (ayna ku jirto u bedelitaanka xarun kale) ee isbitaal walba ama, meelaha lagu hayo dadka aan jirrooyinkooda waxba laga qaban karin (hospice), guryaha dadka lagu xanaaneeyo (nursing home), xarumaha gargaara nolosha (assisted living facility), ama noocii kale ee ah xarun xanaano caafimaad. Haddii aan ogolaaday in la i seexiyo xarun xanaano caafimaad iyadoo la iga daawaynayo jirro xagga maskaxda ah, awoodsiintaas waxaan ku sharxay meel kale ee ka mid ah dardaarankayga hore.
E. Inuu bixiyo awood la igu seexin karo xarun xanaano caafimaad iyadoo la iga daawaynayo jirro xagga maskaxda la xiriirta waxaan ka badnayn 10 maalood ee tusaha bilooyinka sanadka (calendar days) waa haddii aanan diidmo ka keenin seexintaas isla markaasna uu i eegay dhakhtar ka mid ah shaqaalaha meeshaas ama ay magacowday xarunta la soo jeediyay in la i seexiyo kadibna uu si qoraal ah u sharxo inaan qabo jirro xagga maskaxda ah aanna awood u lahayn inaan sameeyo go'aanno macquul ah ee ku saabsan seexitaankayga, iyo inaan u baahanahay in la igu daaweeyo xaruntaas; iyo inuu bixinayo awood la igaga saarayo (ayna ku jirto in la ii bedelo xarun kale) xaruntan;
F. Inuu bixiyo awood la igu seexin karo xarun xanaano caafimaad iyadoo la iga daawaynayo jirro xagga maskaxda la xiriirta waxaan ka badnayn 10 maalood ee tusaha bilooyinka sanadka (calendar days), haddii aan diidmo ka keeno seexintaas, haddii markaasna uu i eegay dhakhtar ka mid ah shaqaalaha meeshaas ama ay magacowday xarunta la soo jeediyay in la i seexiyo kadibna uu si qoraal ah u sharxo inaan qabo jirro xagga maskaxda ah aanna awood u lahayn inaan sameeyo go'aanno macquul ah ee ku saabsan seexitaankayga, iyo inaan u baahanahay in la igu daaweeyo xaruntaas; iyo inuu bixinayo awood la igaga saarayo (ayna ku jirto in la ii bedelo xarun kale) xaruntan. (Dhakhtarkayga ama shaqaalaha caafimaad ee cilmi-nafsiga ku takhasusay waxay halkan ku caddaynayaan inaanan awood u lahayn inaan go'aanno macquul ah sameeyo iyo inaan fahansanahay cawaaqibka bixinta dardaaranadayda hore:
_____);
G. Inuu bixiyo awoodda qaybaha gaarka ee xanaanada caafimaadka ee lagu qeexay dardaarankan [sheeg tixraax-gudba (cross-reference) qaybaha kale ee dardaaranka]. (Dhakhtarkayga ama shaqaalaha caafimaad ee cilmi-nafsiga ku takhasusay waxay halkan ku caddaynayaan inaanan awood u lahayn inaan go'aanno macquul ah sameeyo iyo inaan fahansanahay cawaaqibka bixinta dardaaranadayda hore:
_____);
H. Inuu sii wado adeega uu iigu adeegayo wakiil ahaan xitaa marka ay dhacdo xaalad aan diiday awooda wakiilkayga kadib markii la go'aamiyay inaanan awood u lahayn inaan go'aanno macquul ah sameeyo;
I. Inuu bixiyo awoodda aan uga qayb qaadanyo cilmibaaris walba ee xanaanada caafimaadka ee ay ansaxiyeen guddiga qiimaynta machadka (institutional review

board) ama guddiga qiimaynta cilmibaarista iyadoo la tixraacayo sharciyada federaalka iyo gobolka ee ku habboon kuwaasoo soo bandhigaya rajada faa'idada daawaynta ee aan aniga ka helayo;

J. Inuu bixiyo awoodda aan uga qayb qaadanyo cilmibaaris walba ee xanaanada caafimaadka ee ay ansaxiyeen guddiga qiimaynta machadka ama guddiga qiimaynta cilmibaarista iyadoo la tixraacayo sharciyada federaalka iyo gobolka ee ku habboon kuwaasoo ujeedada looga dan leeyahay ay tahay in la kordhiyo fahanka saynis ahaaneed ee xaalad kasta oo aan qabi karo ama haddii kale lagu horumarinayo caafimaad-ahaansha bani'aadamka, in kastoo ay dhici karto inaysan ii soo bandhigayn rajada faa'ido toos ah ee daawaynta oo aan aniga ka helayo;
K. Inuu ii sameeyo go'aanno la xiriira booqashadayda haddii la i seexiyo xarun kasta ee xanaano caafimaad, taasoo si joogto ah ugu aaddan dardaaranada soo socda: _____; iyo
L. Inuu qaado tallaabooyin walba oo sharci ah kuwaasoo loo baahan yaha sidii loo fulin lahaa go'aanadan, oo ay ku jirto ansaxinta sii-daymaha (releases) ka masuul ahaanshaha (liability) bixiyeyaasha caafimaadka,

Waxaa intaa dheer, wakiilkayga masuul kama noqonayo kharashka ku baxa xanaanada caafimaadkayga isagoo fulinaya awoodiisa, taasoo si gaar ah ugu salaysan awoodaas.

XULASHADA 3aad: AMARRADA XANAANADA CAAFIMAADKA (XARRIIQ DHEXMARI QAYBTA SADARADA A iyo/ama B HADDII AADAN DOONAYN INAAD BIXISO AMARRO KALE EE GAAR AH EE KU SAABSAN XANAANADAADA CAAFIMAADKA).

A. Waxaan si agar u amrayaa inaan helo xanaanada caafimaad ee soo socota haddii caafimaad ahaan ay tahay mid habboon iyadoo la hoos imaanayo xaaladaha uu go'aansadey dhakhtarka ila jooga
   _____
   _____
   _____
B. Waxaan si agar u amrayaa inaan la i siin karin xanaanada caafimaad ee soo socota iyadoo la hoos imaanayo xaaladaha (waxaad sheegi kartaa xaaladaas caafimaad ee aan lagu siin karin iyadoo la hoos imaanayo xaaladaas):
   _____
   _____
   _____

XULASHADA 4aad: AMARRADA MARKA NAFTA LA JOOJINAYO (XARRIIQ DHEXMARI XULSHADAN HADDII AADAN DOONAYN INAAD BIXISO AMARRO KU SAABSAN XANAANNADA CAAFIMAADKAAGA HADDII AAD QABTO JIRRO AAN WAXBA LAGA QABAN KARIN).

Haddii waqtigii ay noqotaba uu dhakhtarka ila jooga uu go'aamiyo inaan qabo jirro aan waxba laga qaban karin halkaasoo isticmaalidda hababka nolosha-dheereeya – oo ay ku jirto neefsasho aan dabiici ahayn, dib-u-soo kicinta wadnaha iyo sambabka, siin aan dabiici ahayn ee nafaqo iyo biyo – ay u adeegayso oo keliya sii dheeraynta habka dhimashada si aan dabiici ahayn, waxaan amrayaa in la joojiyo ama laga noqodo, iyo in la ii ogolaado inaan si dabiici ah u dhinto iyadoo la i siinayo oo keliya daawooyin ama la samaynayo hab caafimaad ee loo

arkay oo keliya inuu lagama maarmaan u yahay xanaanada niyad-dejintayda ama yaraynta xanuunka.

XULASHADA A: Amarro kale ee ku saabsan hababka nolol-dheeraynta. (Haddii aad doonayso inaad bixiso dardaarano, ama aad doodnayso inaad wax ku darto dardaaranada aad kor ku bixisay, halkan ayaad sidaas ku samayn kartaa. Haddii aad doonayso inaad bixiso dardaarano gaar ah ee la xiriira qaar ka mid ah hababka nolol-dheeraynta, sida neefsasho aan dabiici ahayn, dib-u-soo kicinta wadnaha iyo sambabka, siin aan dabiici ahayn ee nafaqo iyo biyo, waa halkan meesha ay tahay inaad ku qorto). Waxaan aniga amrayaa:

_____
_____
_____
_____
_____

XULASHADA B: Amarrada kale ee la xiriira xanaanadayda haddii aan qabo xaalad aan waxba laga qaban karin waa sidan soo socota:

_____
_____
_____
_____
_____

Haddii ay meesha ka maqan tahay awoodayda inaan bixiyo amarro la xiriira isticmaalka hababka nolo-dheeraynta, waxay tahay hadafkayga in dardaarankan hore ay u tixgeliyaan qoyskayga iyo dhakhtarkayga inuu yahay waxii ugu dambeeyay ee aan ku muujiyay xaquuqdayda sharciga ee aan ku diiday xanaano caafimaad isla markaana aan ku ogolaanayo cawaaqibka diidmadayda.

XULASHADA 5^{aad}: MAGACAABISTA WAKIIL SI AAN U BIXIYO DEEQ QAYB AMA XUBIN KA MID AH JIRKAYGA, NUDO AMA DEEQ BIXIN IL (XARRIIQ DHEXMARI HADDII AADAN DOONAYN INAAD MAGACOWDO WAKIIL KUU SAMEEYA ADIGA BIXINTA DEEQDA QAYB AMA XUBIN KA MID AH JIRKAAGA, NUDOHAAGA AMA DEEQ BIXINTA ISHAADA).

Marka aan dhinto, waxaan amrayaa in la suurtogelin karo deeq bixinta dhammaan jirkayga oo idil ama xubahayga qaarkood, nudo, ama deeq bixin il iyadoo la fulinayo Xeerka 2 (§ 32.1 - 289.2 et seq.) ee Cutubka 8 ee Cinwaanka 32.1 iyo iyadoo la raacayo amarradayda, haddii ay qaar jiraan. Waxaan halkan ku magacaabayaa _____
inuu yahay wakiilkayga, ee (cinwaan iyo telefoon lambar)
_____,
inuu sameeyo deeq bixintan jirkayga ama xubin, nudo, ama deeq bixin il kadib marka aan dhinto. Waxaan si dheeraad ah u sii amrayaa in: (amarrada caddeeyaha ee khuseeya deeq bixintan jirkayga ama xubin, nudo, ama deeq bixin il).

_____

Dardaarankan hore yaan la joojin haddii ay dhacdo inay timaado xaalad aan curyaan noqdo.

XAQIIJIN IYO XAQUUQDA KA NOQOSHADA: Markaan hoos saxiixo, waxaan muujinayaa inaan dareen ahaan iyo maskaxba aan awood u leeyahay inaan sameeyo dardaaran hore waxaana kaloo fahansanahay ujeedada saamaynta dokumentigan. Waxaan fahansanahay inaan ka noqon karo dhammaan ama qaybo ka mid ah dokumentigan waqtigii aan doono (i) anigoo ku soo gudbiyay qoraal aan saxiixay, taariikhna leh; (ii) tirtirista ama baabi'inta waxyaalaha ku jira dardaaranka hore oo aan aniga qof ahaan u sameeyo ama aan amro inuu qof kale baabi'iyo anigoo meesha jooga; ama (iii) muujintayda hadalka aan uga dan leeyahay inaan ka noqdo.

_____

(Saxiixa Caddeeyaha) (Taariikh)

Caddeeyaha ayaa saxiixay dardaaranka hore ee horey loo magacaabay anigoo meesha jooga. (Marqaati)

_____

(Marqaati)

_____